



Waxa Loo Baahan yahay Inaad Ogaato

Fulinta Shuruucda Socdaalka ee Magaalada Fridley

Ha ka weecan inaad wacdo 9-1-1 haddii aad u baahan tahay caawimaad

Taageero iyo Deganaan La siinayo Bulshadeena

Xubin kasta oo ka tirsan bulshadeena waxay heli doontaa adeeg cadaalad ah oo aan eex lahayn iyadoon loo eegin xaalada sharciga socdaalka ee shakhsiga.

Booliiska Fridley Ma

- **Weydiyaan doonaan xaaladda socdaalka qofka.**
- Ma sameyn doonaan joojin baaritaan ama talaabo ka dhan ah qof iyadoo lagu saleynayo oo keliya isirka, midab, ama wadanka uu ka soo jeedo.
- Ma wadaagi doonaan diiwaano hay'adaha dawlada dhexe marka laga reebo codsiyada xogta ee uu maamulo sharciga Gobolka.

Booliiska Fridley Waxay

- Si fudud ayaa loogu aqoonsan karaa calaamadaha baajka shaqada, lambarada calaamadaha baajka, jaakadaha aqoonsiga iyo ama aqoonsiga ku dhagan jaakadaha ay xirtaan booliisku.
- Ka jawaab celiyaan haddii aad ka welwelsan tahay saxnimada ama aqoonsiga sarkaal kasta oo sharci fulin ah.
- U shaqeeyaan si xirfad leh oo waafaqsan dastuurka iyadoon jirin wax ka reeban.

Waaxda Booliiska Fridley Ma sameeyaan fulinta Arimaha Socdaalka

- Waaxda Booliiska Fridley ma laha awood sharciyeed ay ku fuliyaan howlaha socdaalka.
- Waaxda Booliiska Fridley ma faragelin karto howlaha hay'adaha dawlada dhexe ee ka fulinaya shuruucda socdaalka gudaha bulshadeenna.

Doorarka Booliiska Fridley ee gudaha Bulshadeena

- Saraakiisha Booliiska Fridley badanaa waxay sameeyaan roondo iyagoo adeegsanaya gaadiid booliis oo si buuxda loo calaamadeeyay (gaadiidka aan calaamadda lahayn waxay leeyihiin taariko Minnesota ah waxayna waafaqsan yihiin sharciga gobolka).
- Haddii gaari laga shakiyo uu isku dayo inuu sameeyo joojin taraafik ama xannibo qof, qofkaasi wuxuu xaq u leeyahay inuu waco 9-1-1 si loo xaqiijiyo saxnimada sharciga gaarigaas.

Xubnaha Waaxda Booliiska Fridley oo ay ku jiraan saraakiisha booliiska, saraakiisha dugsiyada, iyo saraakiisha adeegga bulshada waxay xirnaan doonaan darees ama yeelan doonaan calaamado cad oo Booliiska Fridley ah oo ku yaalla gaarigooda, dharkooda ama jaakadda ay xirtaan.



Ka eeg dhabarka warqadan macluumaadka si aad u aragto tusaalooyin gaar ah oo ku saabsan dareesyada Booliiska Fridley iyo gawaaridooda booliis.

Bidix ilaa midig:
Astaanta iyo Baajka Booliiska Fridley



Waxa Loo Baahan yahay Inaad Ogaato

Fulinta Shuruucda Socdaalka ee Magaalada Fridley

Booliiska Fridley si fudud ayaa loogu aqoonsan karaa calaamadaha baajka shaqada, lambarrada baajka, astaamaha, iyo ama aqoonsiga ku dhaggan jaakadaha ay xirtaan.

Saraakiisha Booliiska Fridley badanaa waxay sameeyaan roondo iyagoo adeegsanaya gaadiid booliis oo si buuxda loo calaamadeeyay. Gaadiidka aan calaamadda lahayn waxay leeyihiin taariko Minnesota ah waxayna waafaqsan yihiin sharciga gobolka.



Sarkaal Booliis



Sarkaal Booliis
(dhabarka jaakadda)



Sarkaal Adeeg Bulsho, Sarkaal Kayd ah, iyo Bartaha Cilmiga Booliiska



Sarkaal Ilaaliya Dugsiyada
(dhar caadi ah oo wata jaakad Booliiska Fridley ah)



Gaariga Booliiska Fridley.



Gaariga Booliiska Fridley
(hal dhinac)

Haddii gaari laga shakiyo uu isku dayo inuu sameeyo joojin taraafik ama uu xannibo qof, qofkaasi wuxuu xaq u leeyahay inuu waco 9-1-1 si loo xaqiijiyo saxnimada sharciga gaarigaas.